



Magaalada Boston
Duqa Magaalada Michelle Wu (Mayor Michelle Wu)
Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada
(Mayor's (Office for Immigrant Advancement)

Shaacin Degdegga:

Xiriirka: Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada
(Mayor's Office for Immigrant Advancement)

Maamulaha Isgaarsiinta

(Communications Manager): Pai En Yu - paien.yu@boston.gov

**DUQA MAGAALADA WU IYO ABAALMARINTA HORUMARINTA
MUHAAJIRKA (MAYOR WU AND IMMIGRANT ADVANCEMENT
AWARD) DEEQDA -YARYAR EE CAAFIMAADKA MADAXA
(MENTAL HEALTH MINI-GRANTS)
KU SOCOTO LIXDA URUR EE U ADEEGTA MUHAAJIRKA**

*\$39,000 waxaa la siiyaa ururada aan doonin fa'iido si ay u taageeraan
brograamyada caafimaadka madaxa ee la siiyo bulshada muhaajiriinta.*

BOSTON - Duqa Magaalada Michelle Wu (Mayor Michelle Wu) iyo Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada (Mayor's Office for Immigrant Advancement) (MOIA) waxay abaal marrin gaarta \$39,000 oo ka koobana deeq yaryar siiyaan 6 ka mid ah ururada u adeega muhaajirka. Maaliyaddu waxay anfici doontaa ururada si ay u balaariyaan brograamyada caafimaadka madaxa ee loogu talagalay bulshadaha muhaajirka.

"Helitaanka adeegyadii hore ee la xariira caafimaadka madaxa waxay loolani ku samayn karaan bulshada muhaajiriinta taasoo ugu wacan dhibaata ay kala kulmaan luqadda iyo hiddaha," ayuu yiri Duqa Magaalada Wu. "Ururadaan aan fa'iidadaa doonin waxay taageeraan caafimaadka madaxa iyagoo adeegsada siyaabo ku habboon meesha ay dadka daggan yahiin, anigana waxaan ka mahad celinaa in Magaalada (City) ay taageeri karto dadaalkooda muhiimka ah ee la fulliyo waqti munaasab ah.



Magaalada Boston

Duqa Magaalada Michelle Wu (Mayor Michelle Wu)

Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada

(Mayor's (Office for Immigrant Advancement)

"COVID-19 wuxuu si kala badan u saameyay bulshadaha muhaajiriinta," ayuu yiri Yusufi Vali, Agaasimaha Xafiiska Duqa Magaalada ee Horumarinta Muhaajirka (Director of the Mayor's Office for Immigrant Advancement). Inta aan ku hawlanahay dadaalka bogsiiinta, waa in aan hormarino caafimaadka madaxa iyo waa in aan raadino siyaabaha cusub oo lagu kaalmeeyo fiyoobida dadka.

Mid kasta oo ka mid ah lixda urur ee kala duwan, aan ka fa'iidadasano, ee u adeega muhaajirka waxaa la siin doonaa \$6,500 si loogu sameeyo brograamyada caafimaadka madaxa. Brograamka waxaa ka mid ah adeegyada kala duwan sida sheekada, goobaha lagu bogsado, iyo carwadaha fanka.

Ururada soo socda waxaa loo xullay in la siiyo Deeqaha Yaryar, xagga Caafimaadka Madaxa MOIA (MOIA Mental Health Mini-Grants):

Kullanka Ilaaha Aasiyaanka-Mareykanka (Asian American Resource Workshop)

(AARW): Bil kasta waxay muhaajiriinta u qabataan kullamada fiyoobida bulshada iyo taageerada madaxa ee la siiyo muhaajiriinta Aasiyaanka ku nool Dorchester

Xarunta Shaqaalaha Brasiil (Brazilian Worker Center): Waxay qorshahooda Mulheres Vencedoras ku ballaariyaan brograam socda 8-todobaad oo horumarinta -maamulka shiddada lala kulmo maalin kasta iyo dareenka caafimaadka

Mashruuca Chica (Chica Project): Waxay isticmaalaan tababar iyo wada hadal si ay wax uga qabtaan qodobada bulshada iyo hiddaha ee wax ku biiriya dhibatooyinka caafimaadka madaxa iyo halista isdillidda ardayda Latinx iyo dumarka madow

Mashruuca Xarunta Bogsiiinta Bulshada (Community Healing Center Project) ee

lala kaashado Kaalmada Iskaashiga Eastie (Mutual Aid Eastie): Waxay marti geliyaan carwadaha fanka iyo kullamada tababarka ee xoogga saara hawlaha bogsiiinta sida goobaha nabadda ee ka jira Bariga Boston (East Boston)

Xarunta Kobcinta Qoyska Massachusetts (Family Nurturing Center for

Massachusetts): Waxay muddo labo bilood qabtaan Wareegyada Kobcinta



Magaalada Boston
Duqa Magaalada Michelle Wu (Mayor Michelle Wu)
Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada
(Mayor's (Office for Immigrant Advancement)

(Nurturing Circles) iyo waxay todobaad kasta bixiyaan fursadaha lagu helo raashiinka caafimaadka u roon ee la siiyo muhaajiriinta Cape Verde ee daggan Dorchester, Allston, Brighton, Hyde Park, iyo Roslindale

Xarunta U Doodidda Waalidiinta Soomaali xagga Waxbarashada (Somali Parents Advocacy Center for Education) (SPACE): Waxay 10ka mid ah kullamada kooxaha yaryar u qabtaan qoysaska muhajiriinta Soomaali ee haystaa caruurta itaalka darran ee daggan Roslindale iyo Roxbury.

Qof kasta oo da neynaaya inuu ku biiro brograamyadaan wuxuu toos ula xariiri karaa ururka.

MOIA waxay sharaako la noqon doontaa Xarunta Leah Zallman (Leah Zallman Center) ee loogu talagalay Cilmi Baarista Caafimaadka Muhaajirka (Immigrant Health Research) si ay u ogadaan sida kuwa la abaal marriyay u hormariyeen ilaha caafimaadka madaxa ee la siiyo muhaajirinta. Natijada waxay anfici karaan hoggaaminta maalgelinta Magaalada ee mustaqbalka.

Wixii ku saabsan Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada (Mayor's Office for Immigrant Advancement)

Xafiiska Horumarinta Muhaajirka ee Duqa Magaalada (MOIA) waxay ku dadalaysa xoojinta awood sinta muhaajiriinta si ay uga qayb galaan xagga dhagaaalaha, bulshada, mujtamaca, iyo dhaqanka ee nololaha Boston. MOIA xataa waxay hormarineysa aqoonsiga ka qayb qadashada muhaajiriinta ee Magaalada. Haddi aad u bahantahay wax intaas dheer, la xiriir boston.gov/immigrants.

###